Erayga iyo Maanta Somtwt 0098
Sharka

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqli jirteen saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **Sharka**

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda, Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Bawlos. Sii dhegayso barnaamijka ka hadlaya **Sharka.** Balse intaynaan idiin billaabin aynu wada dhegaysanno qasiiddadan

Song: Reel---Cut---

Dhowrkii toddobaad ee hore waxaynu ka hadlayno silica nolosha masiixiyiinta la soo gudboonaada. Taasina waxay khusaysaa wax badan Doonista Ilaah, iyadoo Ilaah maalin ka maalin hagayo nolosheenna. Waxaannu ka soo hadalnay qadarta doonista Ilaah, oo waxaannu ka soo hadalnay, doonista kaamilka iyo qoduuskaba ah ee Ilaah.Qaddar baa ku timaadda nolosheenna, waayo markii aynu ku nool nahay dunid dembi leh, dhimashadu waxay ka mid tahay qaddartaas ka dhacda duni dembi miiran ah.

Weliba dadku shilal bay galaan, cudurro ayaa ku dhaca, iyo weliba xiisado dhaqaale. Waxaa dunida ka jira waxyaalahaas oo dhan oo saameeya noloshayada.Ilaahna wuxuu doonayaa inaan garanno inuu inaga samatabbixinaya xiisadahaas ood han gooray ahaataba, dabeetana inaga kaxaynayo noloshan, oo uu ina geynayo tan kale ee uu inoogu diyaariyey jannada, halkaasoo aanay ka jirin walaac, welwlwel, shilal iyo oohin.

Wax silicana ma jiraan halaas, oo Ilaah wuxuu doonayaa inaan garanno in Doonistiisa Qodduuska iyo kaamilkaba ah uu inagu samatabbixiyo, oo ina geeyo jannadii uu inoo diyaariyey. Haatan, inta aynu dunida joogno, waxaa la kulmaynaa muran ay qabaan dad aan Ilaah rumaysnayn, iyo kuwo aan doonayn inay Masiixa rumaystaan, waxayna ka hor yimaadaan markhaatifurkeenna.

Kuwaasi waxay isku dayayaan inay Ilaah caayaan, iyo inay yiraahdaan, **"Waa yahaye, haddii Ilaah sidaas u weyn yahay, muxuu sharka dunida uga dhammayn waayey? Haddii Ilaah uusan doonayn sharka, oo uusan jeclayn, maa sharka soo af-meero oo ka takhaluso? Muxuuse dembi oo dhan u dhamayn waayey? Muxuu noogu siin la' yahay nolol kaamil ah dunida?"**

Waa hagaag, dabcan dadkaas iyaga ah, sidaad og tahay, waxay isku dayayaan inay kula murmaan, oo waxay si xigmadaysan kuu leeyihiin, **"Waa hagaage, waxay innaga noola muuqataa in Ilaah, haddii uu awood leeyahay, uu wax waliba ka adkaan kari lahaa."** Bal taas iyada ah aynu ka munaaqishoonno, oo si yara xigmadaysan innana aynu ugu jawaabno iyaga.

Markii aad eegto rumaysadka masiixyiinta, waxaa qayb ka ah maaddo loo yaqaan **'Sababayn'** ama apologetics. Waa eray weyn, waana kalmad macnaheedu yahay wixii Ilaah sameeyo inay yihiin**'cudurdaarla'aan'.** Waana eray loo isticmaalo difaac, si hannaan xigmadaysan loogaga hor tago doodaha ay dhiibanayaan kuwa Ilaah mucaarada. Haatan masiixiyiintu iyagoo sababaynaya doodda, ayey qofka sidaas liidata

Ilaah u soo qaatay ku leedahay, “Miyeydaan ogayn, haddii Ilaah doonayo inuu sharka dhammeeyo, in innaga oo dhan aynu noqon lahayn sida bobots ama machine oo kale? Haddii Ilaah soo afmeero sharka, oo ay noqoto inuu wixii xaq ah keliya oggolaado, waxaynu noqon lahayn kuwa la mid si sida agabyada ama matoorrada oo kale! Wuxuu taaban lahaa batoon, oo innaga oo dhan waynu sujuudi alahayn, oo tukan lahayn.

Miyaadan haddab ogayn, haddaadan lahayn xoriyadda ikhtiyaarka ah, oo aadan kala dooran karin wanaagga iyo xumaha—waxaad noqonaysaa nin la mid ah sida mashiinta ama matoorrada, mana lahaanaysid dareen ama xoriyad, taas darteedna waxaad noqon lahayd qof sida mashiin oo kale ah. Ilaahna sidaas dooni maayo.

Si markaa aad wax ku jeclaato, waayo jacaylku wuxuu u baahan yahay xoriyad, waa inaad xornimo haysato. Ma jiro qof oo codsan kaa codsan kaa inaad jeclaato! Mana jiro qof kugu khasbi kara inaad jeclaato isaga shakhsiyan. Jacaylku waa ikhtiyaar iyo dareen qofka ka yimaada, laakiin ma ahan fal khasab ah.

Waxaana mar waliba wanaagsan in qofku si ikhtiyaar ah uu kuu jeclaado, laakiin maahan wax khasab ah in lagu jeclaado. Qof sidaas dalban karana ma lahan. Ilaah wuxuu leeyahay, **“Aniguna adiga kugu khasbi maayo inaad I jeclaato, oo dooni maayo inan kaa dhigo, mashiin la maamulo. Waxaa taas ka jecelahay inaad adigu iskaa ii jeclato, oo aad kaskaaga ka maagto.”**

Haatan Ilaah wuu garanayaa in dabeecadeenna dembiilenimo darteed aynaan sidaas u samayn karin,

Markaasina wuxuu ina siiyey Wiilkiisa Ciise Masiix, wuxuuna ina siiyey hadiyadda rumaysadka, oo wuxuu inagu leeyahay, waxaan idinku soo darayaa qoyskayga, waxaanan muuminiinta Ilaah ku noqonaysaan Wiilkayga Ciise Masiix. Wuxuu yimid dunida, wuxuuna ku dhintay Iskutallaabta, oo wuxuu qaaday dembigaaga.

Haddii aad sidaa rumaysan tahay, wuxuu kugu leeyahay, waad isbeddelaysaa, oo waxaan ku siinayaa Iimaan, taasina waa dhalashada cusub. Wuxuun kugu leeyahay, haatan waxaan kaa dhigayaa cunuggayga, waxaanad helaysaa hadiyadda rumaysadka, oo waxaan doortay inaad I jeclaato, laakiin khasab kuguma ahan oo laguguma xayndaabin taas oo keliya.

Waxaad leedahay xoriyadda ama ikhtiyaarka wixii aad doonto aad ku samayn karto. Waxaa kaloo weliba jira shar, oo Shayddaana waa jiraa. Markaasina dooro inaad cadaab aaddo, taasoo ah wax qayracaadi ah inaad doorato, laakiin haddaad doonto, waad dooran karaa. Waxaa loo jeedaa, inay jiraan dad sidaa yeela oo cadaab doorta, taaso markaas ah wax laga noxo.

Laakiin haatan waxaad haysataa hadiyadda Ruuxa Qodduuska ah---waana lagu beddelay, oo waxaad haysataa fursad kale. Waxaad leedahay doorasho ah inaad Ilaah raaco, oo wuxuu kugu leeyahay, waad I jeclaan karaa! Haddaba waxaa ku qoran qidco qiima badan Warqaddii rasuul Bawlos u qoray reer Galatiya 5, taasoo ka hadlaysa xoriyadda aynu Masiixaku haysanno. Balse kan aanIlaah rumaysnayn xoriyaddaas ma haysto. Rumayso ama ha rumaysan, dadka aan rumaysnayn Masiixa waxay la tahay inay

Xor yihiin, laakiin xor maahan laakiin waxa maxbuus u yihiin dembi oo waxaa haysta Shayddaanka. Waxay ku hoos jiraan Shayddaan, mana haystaan arrin kale oo u fran inay dembaabaan maahane. Halka qofka rumaystaha ah, ee masiixa lagu xoreeyey, uu leeyahay fursado. Xaqiiqdii, kan rumaystaha ah, waa kan keliya ee xorta ah, waayo waxaan leennahay ikhtiyaar! Waxaan dooran karnaa inaan shar noqonno oo aan Shayddaanka raacno, oo ah axmaqnimo!

Maxaa qofi u doonayaa inuu dib ugu noqdo maxbuusnimo? Mise waxaan dooran karnaa inaan Ilaah raacno, kaasoo inagu soo furtay wiilkiisa Ciise Masiix, oo ina siiyey Ruuxiisa Qodduuska ah si uu inoogu dhex noolado oo inoo awoodsiiyo. Dabeetana ku noolaanno nolol ka farxisa Ilaah, awoodda uu ina siiyey ee inagu dhex nool aawadeed. Markaasina waxaan haysannaa xoriyaddaas, iyo ikhtiyaar aan ku raacno Ilaah.

Aynu dib ugu noqonnay su'aashii hore, markaasoo kuwa aan rumaysani leeyihiin, **"waa maxay sababta Ilaah aanu u soo dhammaynaynin sharka?"** Waa hagaage, Ilaah taas wuu ku tala jiraa, waxaana jiri doona wakhti, markaasoo Ilaah oran doono, "Intaas ayuu sharkii ku soo dhammaaday, haatan, dhulka waa la laa bayaa, Shayddaankana waxaa la geinayaa caadaab, halkaasoo uu weligii ku noolaan doono, mana awoodi dono inuu dhulka sii joogo kol dambe.

Shayddaankuna ma awoodi doono inuu qof dambe jirabo, ama uu muuminiinta dhibo. Markii xiligaa yimaado, Shayddaanka cabaab baa lagu tuurayaa. Mana jirto xal kale ee uu yeelanayo isaga iyo

Jameecadiisa aan Ilaah rumaysnayn. Haddaba wakhtigaas wuu imanayaa! Haatanse, wuu inala joogaa, oo xor buu u yahay inuu meeshuu doono maro. Masiixa xaqiiqdi wuxuu leeyahay awood ka badan tan Shayddaanka, laakiin dood kama qabo inuu wakhtigan dunida joogo shayddaanku, si innagu aynu u dooranna Ilaah ama Shayddaanka.

Waayo Ilaah wuxuu doonayaa inaan dooranno inan isagajeclaano oo xushmayno. Sidaan horey idiinku sheegay, qofna kuma qasbi kartid inuu ku jeclaado. Qofku waa inuu doorto inuu qof jeclaado iyo in kale. Ilaahna sidaas ayuu doonayaa, ma rabo inuu inagu khasbo inaan Isaga jecaallno, wuxuuse doonayaa inaan ikhtiyaarkeena ku dooranno inaan u adeegno.

Wuxuu inaga doonayaa inaan jeclaanno oo uga mahadcelinno xaqiiqda ah inuu inaga samatabbixiyey sharka. Maalin baa haddaba Ilaah dunida xukumayaa, waana maalinta Xisaabka. Ilaah samir buu ku sugayaa maalintaas, balse dad baa la yaabban waxa Ilaah sugayo. Ilaah jawaabtiisa waxay ku qoran yihiin Hadalladiisa. Ilaah wuxuu sugayaa in dadku ay toobadkeenaa, waana sababta aanu dunida u soo dhamaynaynin.

Sababtaas aawadeed ayaa Kiniisaddu dunida u joogtaa si dadka ay ula qaybsato farriinta badbaadada. Waxaanan u rumaysanaynaa Masiixa si aynu u helno nolosha daa’imka ah. Haddii ujeedadu ahaan lahayd rumaysad un, laakiin aanay ikhtiyaar ahayn in la raaco Ilaah, innaga ood han wuxuu ina geyn lahaa Jannad, waa kuweenna rumaysane. Balse wuxuu dhowrayaa kuwo kale, oo innagana wuxuu inagu dhaafay si aynu hadalka ula wadaagno dad badan.

Waxaanan noqonay af-hayeennada Masiixa, si dadka aynu ula wadaagno farriinta badbaadada, si ay u helaan xamaasadda isbeddelka nolosha, u helaan dhalashada cusub, oo u noqdaan rumayste iyo kuwo raacsan Masiixa. Taasina waa sida dadka lagu badbaadiyo iyadoo loo soo marayo Ciise Masiix, qof waliba ayeyna u furan tahay.

Ciise waxaa la saaray iskutallaabta, wuxuuna siiyey noloshiisii qof kasta. Ciise wuxuu ku dhintay iskutallaabta, wuxuuna bixiyey qiimihii dembiga ee loo haystay qof kasta. Innaguna waxaannu nahay danjirayaashiisii. Waxaannu nahay fariin-walayaashiisii akhbaarka geynayey dunida oo dhan. Waana sababtaas tan aynu idaacadda idinkala wadaagayno Akhbaarkan.

Waxaan rajaynayaa inaad jeclaan lahayd inaad qayb ka noqoto hay'addan. Waxaan quuddaraynayaa inaad jeclaan lahayd inaad Injiilka la qaybsato dadka kale. Idaacaduhu way kharash badan yihiin, dadkuna lacag ma wada haystaan, balse Sayidka ayaa suura geliyey inaan helno maaliyadda loo baahan yahay si warka loo gaarsiiyo Insaanka.

Waxaan filayaa haddaba inaad jawaab waafi ah ka heshay su'aasha ah, **"muxuu sharku uga dhamaan la' yahay, iyo tii ahayd, muxuu Ilaah sugayaa, maa sharka soo dhammeeyo."**Ilaah wuxuu doonayaa inaan ikhtiyaarkeenna ku go'aansanno inaan dadka la wadaagno akhbaarka wanaagsan, si dad badan ay warka u maqlaan maalin waliba iyo inay ogaadaan inay haystaan xoriyad ay waxay doonaan ku qaataan iyo inay Ilaah si furcaddi ah u doortaan iyadoo aan la khasbin. Waxaa ka dhex shaqaynaya Ruuxa Qodduuska ah kuwa Ilaah u yimaada, si ay u

Lahaadaan xoog awoodsiiya inay karaan inay dadka la wqaybsadaan Injiilka, khaasatan kuwa aan weli maqal, una sheegaan badbaadiyaha, oo u noqdaan xubno ka tirsan muuminiinta Ilaah. Waxaan kuu sheegayaa inaad Ilaah weyddiisato inuu ku siiyo rumaysad aad ku qabto Masiixa.

SONG: REEL—CUT---

Waxaa intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale) Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: 0707032060. Farriinta waxaad ka hor-marinaysaan Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060